DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

GARYAQAANKA GUUD EE PUNTLAND

# XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE PUNTLAND

## SOLICITOR GENERAL OFFICE

## مكتب المحامي العام للدولة

## WAAXDA FAAFINTA RASMIGA AH

# SHARCIGA DHIIRI-GELINTA MAALGASHIGA EE DOWLADDA PUNTLAND

## FAAFINTA RASMIGA AH

## OFFICIAL GAZAETTE

## الجريدة الرسمية

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Puntland, Address: Madaxtooyada Puntland, Garowe
Email:gg.pl@plstate.so

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 19AAD | CADADKA 12AAD | TAARIIKH: 24/12/2019 | Lam. 07 |
|---|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

# OFFICIAL GAZETTE

# الجريدة الرسمية

## SHARCIGA DHIIRI-GELINTA MAALGASHIGA DOWLADDA PUNTLAN

## TUSMADA

| | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Ansixinta Wax-ka-badalka Xeerka Dhiiri-gelinta Maalgashiga Dowadda Puntland** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 4aad | Go'aanada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda<br>WAXBA MALEH |

**Sharci Lr. 10 ee December 24, 2019, kuna saabsan Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Dhiiri-gelinta Maalgashiga Dowaldda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland.**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80aad

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/150/2019, kuna taariikhaysan 16/12/2019.

**Markuu tixgeliyey:** Baahida loo qobo **Wax-ka-bedelka Xeerka Dhiiri-gelinta Maalgashiga Dowaldda Puntland**.

**Wuxuu soo saaray**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen **Wax-ka-bedelka Xeerka Dhiiri-gelinta Maalgashiga Dowaldda Puntland**.

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda Puntland.

**Qodobka 3aad**

Dhaqan-gal Sharcigan wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

**Dr. Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

مكتب الرئيس
Office of the President
Puntland State of Somalia

*Tix:-*XGGW/DPL/150/2019 Garoowe, Isniin Taariikh:- 16/12/2019

**Ku: Madaxweynaha Dawladda Puntland** **Garoowe**

**Ujeeddo:- Ansixinta Wax -ka- bedelka Xeerka Dhiiri-gelinta Maalgashiga Dawladda Puntland**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU:-**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa 64-aad

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta K/S Madaxweynaha Ref: MWK/DPS/280/2019 ee September 05 2019, kuna saabsan soo gudbin wax -ka -bedelka Xeerka Dhiiri-gelinta Maalgashiga Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY:-** Baahida loo qabo Ansixinta wax-ka-bedelka Xeerka Dhiiri-gelinta Maalgashiga Puntland

**MARKUU ARKAY:-** Dooddii iyo go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhiga 45-aad fadhigisii 13-aad ee 19/11/2019 Wax-ka-bedelka Xeerka Dhiiri-gelinta Maalgashiga Puntland.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta wax-ka-bedelka Xeerka Dhiiri-gelinta Maalgashiga Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND ★ OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

**Md. Abwaan Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**

**GOLAHA WAKIILLADA**

**مجلس النواب**

# Wax ka bedelka Xeerka Dhiirigelinta Maalgashiga Puntland

**Garoowe, Noveember / 2019**

# Tusmo

Bogga

Qaybta 1-aad:....4
Qodobo Guud....4
Qodobka 1-aad: Magaca,Ujeedka iyo Baaxadda xeerka....4
Qodobka 2-aad: Erey bixin....4
Qodobka 3-aad; U hoggaansanaanta Dawladda ee xeerarka iyo siyaasada maalgashiga Puntland.....5
Qodobka 4-aad: U hoggaansanaanta Xeerka ee Maalgashatada....5
Qodobka 5-aad: Qaababka Maalgelinta....5
Qodobka 6-aad Cadadka lacageed ee Maalgelinta....6
Qaybta 2-aad: Hay'adaha U xil saaran Maalgashiga....6
Qodobka 7-aad Guddiga Dhiiri-gelinta Maalgashiga....6
Qodobka 8-aad: Xilka iyo Waajibaadka Guddiga....7
Qodobka 9-aad: Fadhiyada iyo Go'aammada Guddiga....8
Qodobka 10-aad: Xafiiska Dhiiri-gelinta Maalgashiga....8
Qodobka 11-aad:....9
Masuuliyadda asaasidda, diiwaangelinta Shirkadaha iyo Bixinta Adeegyada Diiwaangelinta ka dib...9
Qaybta 3-aad: Dhiirigelinta Maalgashiga....9
Qodobka 12-aad: U furnaanshaha Maalgashiga....9
Qodobada 13-aad: Xuquuqda Maalgashadaha....10
Qodobka 14-aad: La dhaqanka Maalgashadaha Ajnebiga ah....11
Qodobka 15-aad: Aasaasidda Aagag Ganacsi oo Khaas ah....11
Qodobka 16-aad:....11
Ka Qayb Gelinta Maalgashatada Wax-ka-badalka Xeerarka iyo Siyaasadaha Maalgashiga....11
Qodobka 17-aad:....11
Ka Qayb Qaadashada Qandaraasyada Dawliga ah ee Maalgashatada Ajnebiga ah....11
Qodobka 18-aad: Dhiirri-gelinta Maalgelinta....12
Qodobka 19-aad: U Sahlidda Shaqaalaha Ajnebiga ah....12
Qodobka 20-aad: Dammaanadda Maalgelinta Ajnebiga ah....12
Qodobka 21-aad: Xuquuqda Maalgelinta Hadda Jirta....13
Qaybta 4-aad: Ilaalinta Xuquuqda Maalgashadaha....13
Qodobka 22-aad: Ilaalinta Hantida iyo Raasumaalka Maalgashiga....13
Qodobka 23-aad:....14

Ilaalinta Xuquuqda Hantida Farshaxan, Maskaxeed, Magac, Astaan iyo Hal abuur ee Maalgashadaha ............ 14
Qodobka 24-aad: Dib-u-la-noqoshada Maalgashiga Ajnebiga ah ............ 14
Qodobka 25-aad: Wareejinta Mulkiyadda Maalgashiga ajnebiga ah iyo Shuruucda Ogeysiinta ............ 15
Qodobka 26-aad: Dib u Maalgelinta Faa'iidada ............ 15
Qodobka 27-aad: Xawilaadda Faa'iidada ............ 16
Qodobka 28-aad: Ilaalinta Siraha Ganacsi ee Maalgashadaha ............ 16
Qodobka 29-aad: Xallinta Khilaafaadka ............ 16
Qaybta 5-aad: Diiwaangelinta Maalgashiga ............ 17
Qodobka 30-aad: Habraaca Codsiga Maalgashi ............ 17
Qodobka 31-aad: Shuruudaha Diiwaangelinta Maalgashiga ............ 18
Qodobka 32-aad: Muddada Oggolaanshaha Bixinta Shahaadada Maalgashiga ............ 18
Qaybta 6-aad: Wax-ka-bedalka, Hakinta ama Joojinta Hawsha Maalgashi ............ 19
Qodobka 33-aad: Ku war-gelinta Guddiga ee wax-ka-bedalka iyo Joojinta Hawsha Maalgelinta ............ 19
Qodobka 34-aad: Ku Wargelinta Guddiga ee Qof Saddexaad ............ 19
Qodobka 35-aad: ............ 19
Talaabooyinka ay Qaadayaan Guddigu Marka ay Hesho Wargelinta Wax ka-bedelka Maalgelinta. . 19
Qaybta 7-aad: Burinta Shahaadada Maalgashiga ............ 20
Qodobka 36-aad: Hababka Burinta Shahaadada Maalgashiga ............ 20
Qodobka 37-aad: Habka Burinta Shahaadada Maalgashiga ............ 20
Qodobka 38-aad: Saamaynta Burinta Shahaadada Maalgashiga ............ 21
Qodobka 39-aad: Racfaan Ka Qaadashada Burinta Shahaadada Maalgashiga ............ 21
Qaybta 8-aad: Masuuliyaadka Sharci ............ 21
Qodobka 40-aad: Maalgelinta aan Xeerkan Hoos Imaaneyn ............ 21
Qodobka 41-aad: Waajibaadka Wargelinta la Xiriirta Mucaamalaadka Maalgelinta ............ 22
Qodobka 42-aad: Xadka Amaah Ka Qaadashada Ilaha Dakhliga Gudaha ............ 22
Qodobka 43-aad: U-hoggaansanaan La'aanta Xeerkan ............ 22
Qodobka 44-aad: ............ 22
Ku Tagrifalka Awoodda ama Shaqada ee Mid ka Mid ah Shaqaalaha Xafiiska u qaabilsan Maalgashiga ............ 22
Qaybta 9-aad: Qodobbo Kala Duwan ............ 23
Qodobka 45-aad: Xeer Nidaamiye ............ 23
Qodobka 46-aad: Burin ............ 23
Qodobka 47-aad: Dhaqangal ............ 23

# Qaybta 1-aad
## Qodobbo Guud
## Qodobka 1-aad
### Magaca,Ujeedka iyo Baaxadda Xeerka

1. Xeerkan waxa lagu magacaabaa Xeerka Dhiiri-gelinta Maalgashiga Puntland.
2. Ujeedka xeerkan waa in la dhiirigeliyo lana fududeeyo maalgashiga wadaniga ah iyo kan ajnebiga ah, sida uu qabo qodobka 49-aad ee dastuurka Puntland,
3. Baaxadda xeerkani wuxuu ku baahayaa guud ahaan dhulka Puntland.

## Qodobka 2-aad
### Erey bixin

Ereyada xeerkan ee hoos ku qoran, waxaa loola jeedaa sida soo socota:

1. **Maalgeliye Wadani ah:** Waxaa loola jeedaa, qof kasta oo leh shaqsiyad qaanuuni ah ama u jira qof ahaan ahna muwaadin Soomaaliyeed oo maalgashi ku sameeyey dhulka Puntland.
2. **Maalgeliye Ajnebi ah:** Waxaa loola jeedaa qof kasta oo leh shaqsiyad qaanuuni ah ama u jira qof ahaan, oo aan ahayn muwaadin Soomaaliyeed, oo maalgashi ku sameeya dhulka Puntland si waafaqsan xeerkan.
3. **Wasaaradda:** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Maalgashiga Puntland.
4. **Wasiir:** Waxa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Maalgashiga Puntland.
5. **Maalgelin la Ansixiyay:** Waxaa loola jeedaa, maalgelinta wadaniga ama ajnebiga ah oo ay u ansixiyeen guddiga maalgashigu si waafaqsan xeerkan .
6. **Faa'iido:** Waxaa loola jeedaa, dakhli saafi ah, oo laga bixiyey canshuurihii ku waajibay si waafaqsan xeerarka jira ee Puntland.
7. **Maalgashi Diiwaangashan:** Waxaa loola jeedaa maalgashigii asalka ahaa ee la ansixiyey laguna daray faa'iido dib loo maalgashey si waafaqsan xeerkan.
8. **Guddi:** Waxaa loola jeedaa, guddiga dhiiri-gelinta maalgashiga Puntland.
9. **Xafiis:** Waxaa loola jeedaa, xafiiska dhiiri-gelinta maalgashiga oo maamula hawlaha guddiga.

## Qodobka 3-aad
## U hogaansanaanta Dawladda ee Xeerarka iyo Siyaasadaha Maalgashiga Puntland

1. Dawladdu waa in ay sida xeerku farayo u fulisaa siyaasadaheeda bud dhiga u ah furfurnaanta ganacsi iyo ku dhiirigelinta maalqabeennada wadaniga ah iyo kuwa ajnebiga ahba, si ay u maalgashadaan Puntland.
2. Dawladdu waa in ay fulisaa siyaasadaha muujinaya u diyaar garowga maalgashiga waaweyn ee ku haboon, iyadoo aasaasaysa isla markaasna horumarinaysa agabka dhiirigelinta maalgashiga iyo in ay abuurto suuq xor ah oo furan lana odorasi karo.
3. Hay'adaha kala duwan ee Puntland ee ay khusayso, waa in ay fuliyaan balan-qaadyada siyaasadeed iyo heshiisyada ay si waafaqsan xeerkan ula gasho maalgashatada.

## Qodobka 4-aad
## U hoggaansanaanta Xeerka ee Maalgashatada

Dhammaan maalgashatada wadaniga ah iyo kuwa ajnebiga ah oo ka wada dhaq-dhaqaaqa maalgashi gudaha dhulka Puntland, waa in ay fahmaan isla markaasna u hoggaansanaadaan xeerarka iyo siyaasadaha Puntland, waxaa kaloo ku waajib ah in aysan dhaawac u gaysan nabadgelyada iyo danaha guud ee Puntland.

## Qodobka 5-aad:
## Qaababka Maalgelinta.

1. Maalgelinta dhulka Puntland waxaa loo sameyn karaa hababka soo socda:
    - b. Lacag qalaad oo sarifmi karta oo uu gooyey Bangiga Dhexe ee Puntland.
    - t. Wax kasta oo qalab ah sida, Makiinado, qalab dayactir ah, rakibaadda iyo wax soo saarka, oo soo dejintooda lagu oggolaaday si waafaqsan xeerka soo dejinta.
    - j. Mulkiyadda summadaha ganacsiga iyo ruqsooyinka ee ka diiwaan gashan Puntland, oo aan looga maarmeyn fulinta hawlaha Maalgashiga lagu ansixiyey.

x. Wadarta lacagta qalaad ee la geliyey daraasadaha iyo qoraallada farsamo ee loo diyaariyey, xiriirna la leh maalgelin la oggolaaday.

kh. Faa'iidada dib loo maalgeliyey, oo markeedii hore ka timid maalgashiga ajnabi ama wadani ee la ansixiyay si waafaqsa xeerkan.

2. Maalgashiga la xusay waa in ay ujeeddada loo sameeyey tahay dhismaha ama ballaarinta shirkad lagu dhisay laguna diiwaangeliyay xeerarka Puntland.

## Qodobka 6-aad
## Cadadka lacageed ee Maalgelinta

1. Maalgashiga wadaniga ah, waxa lagu samayn karaa ugu yaraan $100,000(Boqol Kun) oo doolar ama wax u dhigma.
2. Maalgashiga ajnebi, waxaa lagu samayn karaa ugu yaraan $200,000( Laba Boqol oo kun) oo doolar ama wax u dhigma.

## Qaybta 2-aad:
## Hay'adaha U xil saaran Maalgashiga
## Qodobka 7-aad
## Guddiga Dhiiri-gelinta Maalgashiga

. Guddiga ayaa leh awoodda ugu saraysa ee arrimaha dhiiri-gelinta maalgashiga Puntland.
. Tirada guddigu waxay noqoneysaa 7-xubnood
. Guddigu wuxu xafiis ku yeelan doonaa xarunta Wasaaradda Ganacsiga,Wershedaha iyo maalgashiga Puntland.
. Guddigu wuxu yeelan doonaa xeer-hoosaad haga hawlaha guddiga iyo xafiiska maalgelinta.

Guddigu wuxu ka koobmayaa;

b) Wasiirka/Agaasimaha guud ee Wasaaradda Ganacsiga, Wershedaha iyo Maalgashiga.
t) Agaasimaha guud ee Wasaaradda Maaliyadda.
j) Agaasimaha guud ee Wasaaradda Qorshaynta,Iskaashiga Caalamiga ah iyo Horumarinta Dhaqaalaha.
x) Agaasimaha guud ee Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Cayaaraha.

kh) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Kaabayaasha Dhaqaalaha.
d) Agaasimaha Bangiga dhexe ee Puntland.
r) Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga.

6. Guddoomiyaha guddigu wuxu ka imaanayaa Wasaaradda Ganacsiga, Wershedaha iyo Maalgashiga.
7. Guddigu wuxu yeelanayaa xoghaye guud oo fuliya hawl-maalmeedka xafiiska kaas oo isla guddigu magacaabayo.
8. Guddigu waxay hoos tegayaan Wasaaradda Ganacsiga, Wershedaha iyo Maalgashiga.
9. Guddigu waxay ku imaanayaan xilalkooda waxana xeer ku magacaabaya Madaxweynaha Dawladda Puntland.

## Qodobka 8-aad:
## Xilka iyo Waajibaadka Guddiga

Xilka iyo waajibaadka guddigu wuxuu noqonayaa:

Inay u ansaxiyaaan maalgashiga wadaniga ah iyo kan ajnebiga ah si waafaqsan tilmaamaha siyaasadeed ee lagu jideeyey qodobka- 12aad ee xeerkan,

In ay diiwaangeliyaan maalgashiga wadaniga iyo kan ajnebiga ah.

In ay dib u eegaan diiwaan gelinta maalgashiga lagu sameeyay xeerarkii horey u jiray, si maalgashigaasi uu uga faa'iideysto xeerka u roon, sida ku cad qodobka 21-aad ee xeerkan.

In ay go'aamiyaan qiimaha maalgelineed ee la sameeyey sida ku cad qodobka 5aad, farqada 1-aad, xarfaha b, t , j, x iyo kh ee xeerkan.

In ay hubiyaan u hoggaansanaanta qodobka 42-aad ee ku saabsan heshiisyada amaahda laga qaato ilaha gudaha.

Fududaynta dal ku galka shaqaalaha ajaanibta ah ee ay shaqaaleeyaan shirkadaha u diiwaangashan si waafaqsan xeerkan.

Fududaynta ku xallinta sulux khilaafaadka soo kala dhexgala maalgashadaha iyo mid ka mid ah hay'adaha dawladda.

In ay ku matalaan dawladda wada-hadallada iyo heshiisyada maalgashiga.

In ay dabagal ku sameeyaan mashaariicda maalgashi si ay u hubiso in dhiirigelinta la siiyay mashaariicdaas ay waafaqsantahay shuruudaha iyo baahiyaha ku xusan qorshaha ganacsi ee maalgashadaha.

Kaydinta dhammaan xogta maalgashiga Puntland.

In ay warbixin iyo talo ka siiyaan maalgaliyaha arrimaha la xiriira maalgashiga sida, codsiga, nidaamka diiwaangelinta ee lagu sheegay xeerkan, canshuurta, heerka sarrifka lacagaha qalaad, shuruucda dhaqaalaha, nidaamka ganacsiga

shisheeye, fursadaha maalgashiga ee jira, qaab-dhismeedka hay'adda maaalgashiga, ilaha maalgelinta gudaha ee deymaha iyo raadinta shuraakada.

12. In ay maalgeliyayaasha ka kaalmeeyaan shuruudaha dhaqan-gelinta ee la xiriirta maalgelinta oo ay ku jiraan shuruudaha shaqada gudaha.
13. In ay Maalgashiga shisheeye ee la ansixiyey gacan ka siiyaan marxaladaha iskaashiga iyo horumarinta, una fidiyaan hagid iyo talo la xiriirta hay'adaha rasmiga ah ee ku shaqada leh maalgashiga iyo habraaca maamuleed ee loo maro.
14. Qaabaynta talooyin ku saabsan siyaasadda maalgashiga iyo horumarinta shuruudaha maalgashiga.
15. In ay dhiirigeliyaan soona jiitaan maalgashi cusub oo ajnebi iyagoo kaashanaaya hay'adaha kale ee ku lug leh arrimahan.
16. In ay qabtaan hawl kasta oo kale oo ku saabsan dhiiri-gelinta maalgelinta Puntland si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 9-aad
## Fadhiyada iyo Go'aammada Guddiga

Guddigu wuxu yeelanayaa kulamo caadi ah iyo kuwo aan caadi ahayn, waxana lagu faah-faahinayaa xeer-nidaamiyaha guddiga.
Fadhiyada guddigu waxay ku guntamayaan sadex-meelood laba tirada xubnaha guddiga oo guddoomiyuhu ku jiro.
Go'aammada guddigu waxay ku ansaxayaan cod hal-dheeri ah.
Xilka iyo waajibaadka guddoomiyaha guddiga waxa lagu soo saari doonaa xeer-nidaamiyaha guddiga.

## Qodobka 10-aad
## Xafiiska Dhiiri-gelinta Maalgashiga

Xafiiska dhiiri-gelinta maalgashigu,wuxuu noqon doonaa xafiis maamula hawlaha guddiga ee soo socda;

In uu fuliyo go'aammada guddigu gaaro.
In uu guddiga soo hor dhigo xeerarka hawl socodsiinta iyo fulintooda.
In uu soo bandhigo xogo iyo talooyin la xariira maalgelinta wadaniga ah iyo tan ajnebiga, sida codsiga iyo qaabka diiwaangelinta, canshuuraha, sarifka lacagaha qalaad, xeerka dhaqaalaha, hawlaha ganacsiga dibedda, fursadaha maalgelinta, qaab-dhismeedka hay'adaha, shirkadaha iyo iskaashatooyinka, waxyaalaha gudaha laga helo oo amaah lagu qaadan karo si hawsha maalgelinta loo socdsiiyo.
In uu maalgeliyaha gacan ka siiyo sidii uu uga soo bixi lahaa shuruudaha laga doonayo.

5. In uu gacan siiyo maalgelinta la oggolaaday asaasideeda iyo heerka horumarinta, isagoo talooyin ka bixinaya qaabka maamuleed oo ay la socdaan fikredo saamaynaya hay'adaha iyo heerarkooda qaab maamuleed.
6. In uu soo jeediyo arrimaha saameeya siyaasadda maalgelinta iyo sidii loo hagaajin lahaa shuruudaha la xariira.
7. In uu kor u qaado soona jiito maalgelin shisheeye iyadoo lala kaashanaayo hay'adaha arrimahaas ku hawlan.
8. In uu qabto hawl kasta oo kale oo guddigu u xilsaaro si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 11-aad
## Masuuliyadda asaasidda, Diiwaangelinta Shirkadaha iyo Bixinta Adeegyada Diiwaangelinta ka dib

Guddiga ayaa ka mas'uul ah, aasaasidda, diiwaangelinta iyo bixinta adeegyada shirkadaha iyo kambaniyada diiwaangelinta ka dib, si waafaqsan qodobbada ku xusan xeerkan iyo xeerka shirkadaha.
Guddigu waa in ay bixiyaan shahaado muujinaysa nooca shirkadda iyo shaqooyinkeeda asaasiga ah.
Saxiixyada, dukumintiyada, foomamka elektaroniga ah iyo aqbalaadda ku bixinta lacagaha elegtaroniga waa la oggolaanayaa.

## Qaybta 3-aad
## Dhiirigelinta Maalgashiga
## Qodobka 12-aad
## U furnaanshaha Maalgashiga

Dawladda Puntland waxay ku dhirigelinaysaa maalgashade kasta asagoo aan loo eegayn halka uu ka soo jeedo in uu maalgashto dhammaan qaybaha mudnaanta leh ee ganacsiga.
Waa in mudnaanta la siiyaa maalgashiga ku aadan hab:

) U jiheeya wax soo saar cududda aadanaha iyo khayraadka dabiiciga ah ee Puntland.

) Soo kordhiyaa tiknoolajiyad cusub oo ku haboon duruufaha Puntland.

) Abuuraa dakhli cusub ama baajiyaa lacag adag oo ku timid dhoofin, ku beddelasho adeegyada ku saleysan keenista ama hawl adeeg.

x) Qayb ka qaadataa si xilkasnimo ah, horumar waara iyo horumarinta dhaqan-dhaqaale ee gobol ahaan isku dheelli-tiran.

kh) Soo kordhiyaa shaqo abuur ay ka faa'iidaystaan muwaadiniinta Puntland.

3. Maalgashadaha wadaniga ah iyo kan ajnebiga ah, waxaa si gaar ah loogu dhiirigelinayaa in ay maalgashigooda ku jiheeyaan;

b. Beeraha.

t. Xoolaha.

j. Kalluumaysiga.

x. Kheyraadka dabiiciga ah.

kh. Hawlaha warshadaha oo si wax ku ool ah u isticmaala kheyraadka kor ku xusan.

d. Dalxiiska, waxaana shardi u ah in maalgashigaa uu la jaanqaadi karo xaaladaha dhaqan, dhaqaale iyo kaabayaasha jira.

r. Maalgashiga wax soo-saar kasta oo kale, hawlaha tiknoolajiyada, wax soo saarka iyo adeegga aan looga maarmeyn in ay xoojiyaan dardarna geliyaan, ilaa heer la taaban karo, horumarinta qaybaha kor lagu soo sheegay.

4. Arrimaha uu xeerinayo qodobkani kama hor imaanayaan qodobka 40-aad ee xeerkan.

## Qodobka 13-aad
## Xuquuqda Maalgashadaha

Ayadoo aan la baal marayn qodobada xeerar kale, maalgashaduhu wuxuu xaq u leeyahay:

b) In uu samaysto hab-maamulkiisa ganacsi.
t) In uu si madaxbannaan u doorto cidda uu wax ka soo iibsanayo asagoo ahmiyad siinaya ganacsatada yar yar ee Puntland.
j) In uu hantidiisa si xor ah u isticmaalo.

## Qodobka 14-aad:
## La dhaqanka Maalgashadaha Ajnebiga ah

Maalgashadaha ajnebiga ah waxaa uu ka baayici karaa saami shirkadaha maalgashi ee ka hawl-gala Puntland, waana in loola dhaqmaa si u dhiganta sida loola dhaqmo maalgashadaha wadaniga ah marka loo eego dhiirigelinta iyo adeegyada maalgelinta.

## Qodobka 15-aad
## Aasaasidda Aagag Ganacsi oo Khaas ah

1. Dawladdu hadii loo baahdo, si ay u dhiirigeliso u furfurnaanshaha maalgashiga, waxaa ay abuuri kartaa aagag dhaqaale oo gaar ah ama siyaasado iyo talaabooyin tijaabo ah oo ku wajahan maalgashiga.
2. Dawladdu ayadoo raacaysa qorshaha qaran ee horumarinta dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada, waxaa ay ku dhiiri-gelin kartaa kuna hagi kartaa maalgshatada in ay maalgashi ku sameeyaan warshado, aagagga ama ganacsi khaas ah.

## Qodobka 16-aad
## Ka Qayb Gelinta Maalgashatada Wax-ka-badalka Xeerarka iyo Siyaasadaha Maalgashiga

1. Dawladdu waa in ay abuurtaa nidaam ay kula wadaagayso maalgashatada xeerarka, siyaasadaha, hagidda, xogta mashaariicda maalgashi iyo wixii kale oo ay u baahdaan.
2. Tilmaamaha iyo talooyinka ay soo jeediyaan maalgashatadu waa in ay dawladdu sida ugu haboon u tixgelisaa marka ay wax-ka-badalayso ama abuurayso, xeerar iyo nidaam la xiriira maalgashiga.

## Qodobka 17-aad
## Ka Qayb Qaadashada Qandaraasyada Dawliga ah ee Maalgashatada Ajnebiga ah

Dawladdu waxay ballan qaadaysaa, in maalgashatada ajnebiga ah ka qayb qataan qandaraasyada dawliga ah iyadoo lagu salaynaayo tartan loo siman yahay.

## Qodobka 18-aad
## Dhiirri-gelinta Maalgelinta

Maalgelinta wadaniga ah iyo tan ajnebiga ah, waxay mudnaan u yeelaneysaa dhiirrigelin iyo fududayn ay kamid tahay:

1. Fursad lagu heli karo heshiis kiro muddo dheer ilaa 50 sano ah oo lagu beddelanayo maalgelin wax- ku- ool ah si waafaqsan xeerarka jira.
2. Maalgelinta wadaniga ah iyo tan ajnebiga ah, waxaa laga dhaafayaa canshuurta la saaro macaashka muddo sadex sano ah laga bilaabo waqtiga ay shaqadu bilaabato.
3. Marka ay dhammaato waqtiga canshuur-dhaafku, Maalgeliyaha waxaa laga dhimi doonaa cashuurtaas 50% boqolkiiba konton bacdamaa uu macaashkiisii dib ugu maalgeliyey dalka.

## Qodobka 19-aad
## U Sahlidda Shaqaalaha Ajnebiga ah

1. Guddigu wuxu kala shaqaynayaa Xafiiska socdaalka iyo jinsiyadaha in-uu-u-fududeeyo dal-ku-galka iyo deganaanshaha shaqaalaha iyo xaasaskooda ay hay'addaha maalgashigu la yimaadaan.
2. Guddigu waxay ballan qaadayaan, in sabab shaqo awgeed u safri karaan meel kasta oo Puntland ka mid ah shaqaalaha ajnebiga ahi.
3. Shirkad kasta oo ku diiwaangashan xeerkan waxay shaqo qoreysaa shaqaale Puntland ah oo tayadooda wanaagsan tahay marka ay suura gasho.
4. Maalgelinta ajnebiga ahi waa in ay tahay mid keeni karta horumar wax ku ool ah xagga tegnooloojiyada, aqoonta sare ee maamulka iyo sare u qaadidda xirfadlayaasha jooga Puntland, ayagoo ugu yaraan shaqaalaysiinaya 60% dadka degan Puntland.

## Qodobka 20-aad
## Dammaanadda Maalgelinta Ajnebiga ah

1. Dhammaan mashaariicda loo sameeyey maalgelinta ajnebiga ah, waxaa loola dhaqmayaa si la mid ah mashaariicda wadaniga ah.

2. Hantida maalgelinta ajnebiga ah ee lagu diiwaangeliyey xeerkan la-lama wareegi karo marka laga reebo xaalad dan guud oo aan si kale loo xallin Karin.
3. Haddii ay dhacdo in lala wareego, waa in si dhakhso ah loo bixiyaa magdhow u dhigma hantida lala wareegey, magdhowgaasi waa inuu u dhigmaa qiimaha suuqa oo caadil ah si xor ahna loo xawili karo.
4. Markii ay timaado xaalado adag oo aan laga fursan karin (force mature) sida duufaan, dhulgariir IWM, Dawladda Puntland ma dammaanad qaadi karto xuquuqda maalgaliyayaasha ajnebiga ah.

## Qodobka 21-aad
## Xuquuqda Maalgelinta Hadda Jirta

1. Maagalinta wadaniga ah iyo kan ajnebiga ee hadda ka jirta Puntland ee lagu diiwaangeliyay xeerarkii hore ee ku saabsan maalgashiga, waxay lahaanaayaan wax kasta oo xuquuq iyo waajibaad lagu siiyay xeerarka la xusay.
2. Maalgelinta noocaan ah waxay xaq u leeyihiin, in ay ka faa'iideystaan, uuna maageliyuhu dooran karo nidaamka xeerka cusub, haddii shuruudihii diiwaangelinta iyo nidaamka xeerkii hore la dhowray, maalgeliyuhuna keeno caddeymo qoraal ah oo sidaas muujinaya laguna kalsoonaan karo.
3. Haddii ay dhacdo arrimaha ku xusan farqada 2-aad ee qodobkan, maalgeliyuhu wuxuu guddiga weydiisan karaa diiwaangelin waafaqsan xeerka cusub muddo boqol iyo labaatan maalmood (120) gudahood oo ka billaabaneysa taariikhda xeerka cusub la soo saaray.

## Qaybta 4-aad:
## Ilaalinta Xuquuqda Maalgashadaha
## Qodobka 22-aad
## Ilaalinta Hantida iyo Raasumaalka Maalgashiga

1. Maalgashaduhu wuxuu xaq u yeelanayaa in uu yeesho hanti gaar u ah, hantidaa kaligii ha yeesho ama cid kale ha la lahaatee laguma xad gudbi karo.
2. Xaq ama dan ku wajahan hanti qayb ka ah maalgashi, lama xanibi karo, lalamana wareegi karo, hadii uusan qodob sharci ah sidaa sheegayn.

## Qodobka 23-aad
## Ilaalinta Xuquuqda Hantida Farshaxan, Maskaxeed, Magac, Astaan iyo Hal abuur ee Maalgashadaha

1. Xuquuqda farshaxan, maskaxeed, magac, astaan, hal-abuur ee maalgashadaha iyo dhammaan xuquuqda sharciga ah ee la xiriirta kala wareejinta tiknoolajiyada, waa in loo dammaanad qaadaa si waafaqsan xeerarka ku haboon.
2. Dawladdu waa in ay dhawrtaa xuquuda iyo danaha sharciga ah ee qofka wata xaquuqda maskaxeed iyo kuwa la xiriira.
3. Haddii lagu xad-gudbo xuquuqda ku xusan farqadaha 1-aad iyo 2-aad ee qodobkan, waa in ay si waafaqsan xeerarka la xiriira ay ka dhalataa mas'uuliyad sharci oo la adkeeyay.

## Qodobka 24-aad
## Dib-u-la-noqoshada Maalgashiga Ajnebiga ah

1. Maalgashiga ajnebiga ah ee sharci ahaan u diiwaangashan, waxaa dibadda looga saari karaa shan sano ka dib laga bilaabo maalinta la diiwaangashey maalgashiga asalka ah ee ku cayiman shahaadada maalgelinta shisheeye ee diiwaangashan, isla markaana la xaqiijiyo in dhammaan cashuurtii iyo waajibaadkii looga lahaa Puntland la bixiyay.
2. Maalgashadaha ajnebiga ah wuxuu dib ula noqon karaa:

   b. Raasumaalka.

   t. Faa'iidada laga helay dhaqdhaqaaqa ganacsi.

   j. Iibinta qalabka ka yaalay dalka.

   x. Iyo wixii hanti ee kale oo ka yaala dalka.
3. Guddigu waa yarayn karaan muddadaa la sheegay, iyada oo la tix-gelinayo arrimaha mudnaanta leh ee soo hoos galaaya tilmaamaha siyaasadda sida ku cad qodobka 12-aad ee xeerkan.
4. Dibad u wareejinta maalgelinta waxaa lagu sameyn karaa lacagtii qalaad ee asalka ahayd ee ku cad shahaadada maalgelinta shisheeye ee diiwaangashan.
5. Maaliyadda loo wareejinayo dibadda, waa in ay tahay mid ka dhalatay iibinta wareejinta hantida iyo saamiyaasha shirkadda kana mid ah maalgelinta ajnebiga ah ee leh shakhsiyad qaanuuneed ama shakhsi ahaanba u jira, maalgeliyaha ajnebiga ah, wuxuu awood u leeyahay in uu dibadda u wareejisto hantida maguurtada ah ee maalgelinta mashruuca haddii uu doorto.

6. Haddii lacagta ka soo baxday iibinta hantida maguurtada ah ay ka badato maalgelintii asalka ahayd ee lagu daray faa'iidada dib loo geliyey ee diiwaangashan, maalgeliyaha ajnebiga ahi wuxuu xor u yahay dibad u wareejinta farqiga, asagoo raacaya shuruucda canshuuraha ee jira iyo qawaaniinta sarrifka ee lacagaha qalaad.

## Qodobka 25-aad
## Wareejinta Mulkiyadda Maalgashiga Ajnebiga ah iyo Shuruucda Ogeysiinta

1. Wareejinta mulkiyadda maalgelinta ajnebiga ah waxay ku imaaneysaa iibinta hantida ama u wareejinta saamiyaasha mashruuca la maalgeliyey qof ama hay'ad shakhsiyad qanuuneed leh.
2. Xaaladda u wareejinta maalgelin ajnebi qof ama shakhsiyad qaanuuneed oo muwaadin Puntland ah, wareejiyuhu wuxuu luminayaa inuu ka faa'iideysto wixii xuquuq ahaa ee uu ku heli lahaa maalgeliye ajnebi ahaan.
3. Wareejin kasta waxaa waajib ku ah wareejiyaha iyo la wareegaha in ay ka hor wareejinta ku wargeliyaan guddiga, wargelintaa waxay raacsiinayaan qoraallada iyo dokumenti taageeraya kala wareejinta.
4. Ku wareejinta maalgelinta ajnebi ee maalgeliye kale oo ajnebi ah, uma baahna oggolaansho cusub sida ku cad qodobka- 32aad ee xeerkan, waa in ay wargeliyaan guddiga oo kaliya sida ku xusan faqradda 3-aad ee isla qodobkan.

## Qodobka 26-aad
## Dib u Maalgelinta Faa'iidada

1. Faa'iidada asal ahaan ka timid maalgelin diiwaan-gashan, dib ayaa loogu maal gelin karaa isla mashruucii maaglinta hore loogu sameeyey ama mashruuc kale, si waafaqsan xeerkan.
2. Marka faa'iidada noocaas oo kale dib loogu maal geliyo, waa in lagu soo wargeliyaa guddiga si toos ah ama fariin qoraal oo diiwaan-gashan, laguna caddeyn karo warqadda gaarsiinta.
3. Guddigu waxay ku dhaqaaqayaan in ay diiwaan geliyaan faa'iidada maalgelin dib loo sameeyay iyadoo la isticmaalayo lacag la sarrifi karo taasoo ku cad shahaadada maalgelinta lagu diiwaan geliyey, qiimaha waxaa lagu saleynayaa si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka lagu maamulo lacagaha qalaad.
4. Markaas ka dib guddigu waxay soo saarayaan shahaadada dib-u-maalgelinta faa'iidada.

5. Xuquuqda raaceysa wareejinta faa'iidada, dib u celinta maalgelinta iyo faa'iidada uu xeerkani tilmaamayo, waxaa lagu saleynayaa maalgelintii asalka ahayd oo lagu daray faa'iidada dib loo maalgeliyey.
6. Haddii faa'iido dib loogu maalgeliyo mashruuc, aan ahayn mashruuc ku diiwaangashan maalgashiga, waxaa lagu dhaqayaa qodobada 31-aad iyo 32-aad ee xeerkan.

## Qodobka 27-aad
## Xawilaadda Faa'iidada

1. Faa'iidada asal ahaan ka timaada maalgashi oo si sharci ah u diiwaangashan ahna lacag sarifmi karta, si xor ah ayaa dibadda loogu xawilan karaa.
2. Haddii faa'iidadaasi qayb ka mid ah loo xawilo dibadda sannad gudihiis, maalgeliyuhu wuxuu haraaga xawilan karaa sanooyinka xiga.

## Qodobka 28-aad
## Ilaalinta Siraha Ganacsi ee Maalgashadaha

1. Qaybaha maamul ee dawladda iyo shaqaalahoodaba waxaa ku waajib ah in ay ilaaliyaan xogta iyo siraha ay ka helaan maalgashadaha marka ay masuuliyaadkooda sharci gudanayaan.
2. Waxaa mamnuuc ah in ay xogtaas ama sirahaas baahiyaan ama si sharci darro ah ula wadaagaan cid kale.

## Qodobka 29-aad
## Xallinta Khilaafaadka

Khilaafaadka ka yimaada hirgelinta xeerkan waxaa lagu xalinayaa sidatan;

1. Hab marka horeyba lagula heshiiyey maalgeliyaha.
2. Inta u dhaxaysa qaab dhismeedka heshiisyada u dhexeeya Dawladda Puntland iyo maalgeliyaha iyadoo aaney jirin wax heshiis ah oo ku saabsan khilaafaadka waxaa lagu xallinayaa dhexdhexaadin, waxaana la magacaabayaa guddi dhexdhexaadin oo ka kooban min hal xubin oo ka kala socda dhinacyada iyo xubin saddexaad oo noqda guddoomiye ku meel gaar ah oo dhinacyadu ku heshiiyeen.
3. Dhinacyadu khilaafkooda waxaa ay ku dhamaysan karaan qaab caalami ah.

4. Haddii lagu guul darreysto heshiiska in xubin saddexaad la magacaabo guddoomiyaha waxaa magacaabaya iyadoo labada dhinacba codsanayaan Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Puntand.
5. Guddiga dhexdhexaadinta wuxuu amrayaa sidii xeerka loo raaci lahaa ama u dabiqi lahaa hab aan la caburin karin sida qawaaniinta madaniga ah iyo xeerka ganacsiga iyagoo isla mar ahaantaas badbaadinaya qawaaniinta saldhiga u ah si looga gungaaro wixii asal ahaan keenay khilaafka.
6. Guddiga dhexdhexaadinta wuxuu eegi doonaa in khilaafka lagu xaliyo sida ugu habboon, waxaana la tixgelinayaa laguna dhaqmaaya codadka inta ugu badan, go'aankuna wuxuu noqon doonaa mid kama dambays ah oo ku fula labada dhinac ee is-haya ama dabra khilaafka.
7. Guddiga dhexdhexaadintu iyaga ayaa go'aaminaya cidda bixinaysa kharashka dhexdhexaadinta.

## Qaybta 5-aad
## Diiwaangelinta Maalgashiga
## Qodobka 30-aad
## Habraaca Codsiga Maalgashi

1. Maalgashade kasta waxaa laga doonayaa in uu buuxiyo foom muujinaya aqoonsigiisa iyo xogta kale ee looga baahan yahay, si uu u helo shahaadada maalgashiga oo ay guddigu bixiso, una hanto dhiirigelinta xeerkani siinayo maalgashadaha.
2. Codsiga maalgeliyuhu wuxuu ka billaabanayaa buuxinta arjiga codsiga ansixinta iyo diiwaangelinta, waxaana laga heli karaa xafiiska guddiga maalgashiga ee loogu diraayo boostada hab diiwaan-gashan, ama adeeg leh helitaanka gaarsiinta ee guddiga dhiiri-gelinta maalgashiga.
3. Waxaa kale oo u bannaan maalgeliyaha, inuu codsi si toos ah u geysto xafiiska guddiga, oo siinaya caddeyn gaarsiin, codsiyada waxaa kale oo email loogu diri karaa guddiga, iyadoo la weydiisanayo helitaanka gaarsiinta.
4. Codsaduhu waa in uu bixiyaa khidmad aan u soo noqanayn, inta ay noqonayso khidmadaasi waxaa lagu go'aaminyaa xeer-hoosaadyada.
5. Guddiga waxaa ay darsayaan codsiga si loo hubiyo, loona caddeeyo in ay dhammeystiran yihiin shuruuduhu laguna qancay.

## Qododbka 31-aad
## Shuruudaha Diiwaangelinta Maalgashiga

Codsiga diiwaangelinta maalgashiga waa in ay la socotaa:

1. Shahaadada asaasidda shirkadda
2. Qorshe ganacsi oo ay ugu yaraan ku jirto;

   b. Magaca iyo xogta mashruuca oo dhammaystiran.
   t. Qorshaha shaqo.
   j. Xilliga uu hawsha bilaabayo.
   x. Xog dhammaystiran oo ku saabsan khayraadka aan diyaarsanay (row materials) ee laga helo wadan ama meesha ay ka shaqanayso maalgelintu.
   kh. Xog dhammaystiran oo ku saabsan maalgelinta iyo hantida laga keenayo meel ka baxsan Puntland, ayadoo la raacinayo xilliga maalgelintaas iyo hantidaas la fulinayo.
3. Qiimayn suuq
4. Xogta tignoolajiyada iyo aqoonta laga helayo mashruuca

## Qododbka 32-aad
## Muddada Oggolaanshaha Bixinta Shahaadada Maalgashiga

1. Muddo lixdan (60) maalmood gudahood ah, laga bilaabo maalinta la qabtay arjiga maalgashiga oo dhammeystiran, guddigu go'aankooda waa in ay ku ogeysiiyaan codsadaha warqad diiwaan-gashan, haddii uu codsaduhu doorto, waxaa xafiiska toos uga qaadi kara qof wakiil ka ah oo caddeyn laga reebo inuu qaaday go'aanka.
2. Haddii loo baahdo wax ka beddel arjiga codsiga ah, guddigu waa in ay isbeddelkaas ku ogeysiiyaan codsadaha warqad diiwaangashan ama waxaa toos xafiiska uga qaadi kara qof ka wakiil ah.
3. Guddigu waxaa ay ogaysiinayaan oggolaanshaha maalgeliyaha, waxayna soo saarayaan shahaado maalgelin ee mashruuca la oggolaaday, oggolaanshahaas wuxuu maalgeliyaha xaq u siinaayaa diiwaangelinta maalgelinta si waafaqsan xeerkan.
4. Shahaadada maalgashiga mashruuca la oggolaaday, waxay jireysaa muddo 24 bilood ah laga bilaabo maalinta la bixiyay, muddadaas gudaheeda, codsaduhu waa in uu dalka ku soo wareejiyaa hantida ku tilmaaman qodobka 5-aad, faqradiisa 1-aad, xarfaha b, t ,j iyo x, haddii muddadaas la dhaafo, guddigu waxa ay siin kartaa, haddii uu weydiisto codsaduhu, muddo dheeraad ah, ama in uu keensado codsi cusub.

5. Si loogu kordhiyo maalgelin dheeraad ah sida ku xusan qodobka 5-aad, farqadiisa 1-aad, xarfaha, b, t, j, iyo x, mashruuc horey loogu sameeyey maalgelin diiwaan-gashan waxaa loo baahan yahay codsi iyo oggolaansho, sida ku cad qodobka 31-aad iyo faqradaha, 1,2, 3, iyo 4-aad ee qodobkan.

## Qaybta 6-aad
## Wax-ka-bedalka, Hakinta ama Joojinta Hawsha Maalgashi
### Qodobka 33-aad
### Ku war-gelinta Guddiga ee wax-ka-bedalka iyo Joojinta Hawsha Maalgelinta

Maalgashadaha diiwaangashan, waxaa ku waajib ah in uu muddo aan ka badnayn soddon(30) maamlmood u gudbiyo guddiga wargelin qoraal ah ka hor inta uusan:

b) wax ka bedelin nuxurka maalgelinta.
t) hakin hawsha maalgelinta, markaan oo kale, maalgashaduhu waa in uu muujiyaa muddada hakinta.
J) Gabi ahaanba joojinta maalgelinta.

### Qodobka 34-aad
### Ku-war-gelinta Guddiga ee Qof Saddexaad

Qof kasta oo aan ahayn maalgashadaha diiwaangashan, kaas oo dani kaga jirto maalgashiga, ayna saamaysay hakinta ama joojinta maalgelinta, waxaa uu xaq u leeyahay in uu soo wargeliyo guddiga.

### Qodobka 35-aad
### Talaabooyinka ay Qaadayaan Guddigu Marka ay Hesho War gelinta Wax ka-bedelka Maalgelinta.

1. Guddigu markii ay helaan wargelin wax-ka-badal oo waafaqsan xeerkan, wax-ka-badal kaasna uu noqdo mid saamayn ku yeelanaya shuruudaha ku xusan qodobka 31-aad ee xeerkan, laakiinse uusan waxyeelayn shuruudaha u qalmidda

dhiirigelinta maalgashiga, waxaa ay wax-ka-badalayaan shahaadada maalgashiga si ay uga muuqato isbadalka lagu soo wargeliyey.

2. Marka wax-ka-badalku uusan saamayn ballan qaadka uu sameeyey maalgashaduhu, guddigu waa ay kaydinaysaa kaliya wargelinta wax ka bedelka.

## Qaybta 7-aad
## Burinta Shahaadada Maalgashiga
## Qodobka 36-aad
## Asbaababha Burinta Shahaadada Maalgashiga

Shahaado maalgashi waxaa lagu burin karaa:

1. Markii bixinteeda lagu saleeyay xog uu si been abuur iyo khiyaano ah u bixiyey maalgashaduhu.
2. Markii isbedel wayn dhaco kaas oo ujeedka maalgashiga wax-ka-badalaya.
3. Markii uu maalgashaduhu ku guul darraysto in uu fuliyo waajibaadka uu xeerku farayo.

## Qodobka 37-aad
## Habka Burinta Shahaadada Maalgashiga

1. Ka hor intaanan la burin shahaadada maalgashiga, guddigu waa in uu gaarsiiyaa maalgashadaha wargelin qoraal ah, iyada oo lagu caddaynayo sababaha lagu buriyey shahaadadaas iyo ka codsiga in uu maalgashaduhu ka bixiyo faah-faahin suurta gal ah arrimahaas lagu haysto.
2. Maalgashadaha diiwaan gashan Toban maalmood (10) gudahood laga bilaabo maalinta ay guddigu la wadaagey qoraalka wargelinta, waa in uu ku soo gudbiyaa faah-faahin ku saabsan arrimaha lagu haysto.
3. Hadii maalgashaduhu uu ku soo gudbin waayo faah-faahinta arrimaha lagu haysto muddadii loogu talagalay, ama guddigu ay ku qanci waayaan faah-faahintaas,waxaa ay burinayaan shahaadadii maalgashiga.

## Qodobka 38-aad
## Saamaynta Burinta Shahaadada Maalgashiga

Marka burinta shahaadada maalgashiga sal looga dhigay sababta ku xusan qodobka 36-aad faqradiisa 1-aad, maalgashadaha waxaa laga doonayaa in uu dib u soo celiyo cadad dhan dhiirigelintii loo siiyay shahaadadaas awgeed.

## Qodobka 39-aad
## Racfaan Ka Qaadashada Burinta Shahaadada Maalgashiga

Haddii uu maalgashaduhu ku qanci waayo sababta burinta shahaadada, wuxuu Toban maalmood (10-maalmood) gudahooda laga soo billaabo markii la oggaysiiyay burinta shahaadada, uu racfaan u qaadan karaa Wasiirka,Wasiirkuna waa in uu racfaanka go'aan uga gaaraa Toban maalmood (10) gudahooda laga soo billaabo maalintii looga keenay racfaanka, ka dib marka uu arko warbixinta guddiga.

## Qaybta 8-aad:
## Masuuliyaadka Sharci
## Qodobka 40-aad
## Maalgelinta aan Xeerkan Hoos Imaaneyn

1. Nidaamka xeerkan laguma dhaqayo maalgelinta la xiriirta baarista macdanta iyo hawlaha soo saaridda macdanta oo ay ku jiraan kuwa la xiriira warshadaha batroolka iyo gaaska.
2. Maalgelintaas waxaa lagu dhaqayaa xeerka baarista iyo soo saaridda shidaalka, gaaska, macdanta iyo xeer-nidaamiyaasha iyo heshiisyada ay isla galeen Dawladda Puntland iyo ciddii dan ka leh.
3. Haddii uu maalgashade, maalgashado mid kamid ah qaybaha maalgashi ee xeerkani u diidayo, hay'adaha dawladeed ee qaabilsan arrintaas waa in ay amraan in la joojiyo dhaq-dhaqaaqa maalgelintaas, ayna la wareegto saamiyada, iyo hantida maalgashigaas, ama ay qaado talaabo kasta oo muhiim u ah arrintaas.

## Qodobka 41-aad: Waajibaadka Wargelinta la Xiriirta Mucaamalaadka Maalgelinta

1. Bangiyada, Nootaayooyinka iyo Hay'adaha Dawladda ee ku lug leh maalgelinta, waa in ay guddiga ku wargeliyaan wixii dhaqdhaqaaq macaamileed ee ay la yeeshaan, Soddon maalmood (30) guddahood, laga billaabo maalinta dhaq-dhaqaaqa macaamilaadka la sameeyey.
2. Arrinta ku xusan farqada koowaad, waxa ay la xiriirtaa arrimaha ay ka mid yihiin dhismaha shirkadaha iyo mashaariicda, amaah ka qaadashada hay'adaha dakhliga dhaqaalaha ee gudaha ama dibedda, xawilaadda faa'iidada iyo dibad u wareejinta maalgelinta.
3. Hadii ay hay'adahaasi ku guul dareystaan in ay xogtaas muddadii loogu talagalay ku soo gudbiyaan waxa lagu ganaaxayaa Boqolkiiba Toban (10%) qiimaha wax is waydaarsi ee la qariyay.

## Qodobka 42-aad: Xadka Amaah Ka Qaadashada Ilaha Dakhliga Gudaha

1. Shirkad kasta oo ujeeddadeedu tahay maalgelin si sharci ahna u diiwaan gashan, waxay amaah ka qaadan kartaa hay'adaha ilaha dakhliga ee gudaha ilaa xadka uu gooyey Bankiga Dhexe ee dawlada Puntland.
2. Dakhliga ka soo baxa amaahdii laga qaatay ilaha gudaha, waxaa loo isticmaali karaa oo keliya fulinta hawsha ku tilmaaman shahaadada maalgelinta ee diiwaan gashan, guddigu waxay awood u leeyihiin inay hubiyaan in sidaa loo fuliyey.

## Qodobka 43-aad: U-hoggaansanaan La'aanta Xeerkan

U hoggaansanaan la'aanta maalgashadaha ee xeerkan, waxa ay dhaxalsiinaysaa inuu waayo wixii faa'iido ama xuquuq uu ku heli lahaa xeerkan.

## Qodobka 44-aad Ku Tagrifalka Awoodda ama Shaqada ee Shaqaalaha Xafiiska U-qaabilsan Maalgashiga

1. Haddii uu mid ka mid ah shaqaalaha hay'ad maamul uu ku tak-rifalo awooddiisa ama shaqadiisa, si gabood fal ah ama sharci darro ah u fuliyo asagoo shaqsi

ahaan uga faa'iidaya mar kasta uu ku guda jiro shaqadiisa dhiirigelinta maalgelinta, ilaalinta iyo maamulidda maalgashiga ama si sharci darro ah ula wadaago qof kale xog sir ah ee uu ka helay maalgashadaha inta uu shaqada ku jiray, waxa uu noqonayaa eedaysane.

. Ciddii ay ku caddaato gelista fal-dembiyeedka ku xusan farqada 1-aad ee qodobkan, wuxu noqonayaa dembiile, waxana lagu ciqaabayaa si waafaqsan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed.

## Qaybta 9-aad
## Qodobbo Kala Duwan
### Qodobka 45-aad:
### Xeer Nidaamiye

Guddiga dhiiri-gelinta maalgashigu, waxay soo saarayaan xeer-nidaamiyeyaal lagu hago hawlaha fulinta xeerkan.

### Qodobka 46-aad
### Burin

Waxa la buriyey xeer kasta oo aan la socon karin ama ka hor imaanaya xeerkan.

### Qodobka 47-aad
### Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa markuu Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.